



# Macluumaadka tallaalka

Si taxadar leh u akhri macluumaadka hoose kahor intaadan saxiixin foomka oggolaanshaha. Si aad waxbadan uga ogaato booqo [healthywa.wa.gov.au/immunisation](https://healthywa.wa.gov.au/immunisation)

	Human Papillomavirus (HPV)	Diphtheria-tetanus-pertussis (dTpa)
<b>Maxuu yahay cudurku?</b>	<p><b>Human papillomavirus (HPV)</b> waa fayras caam ah oo saameeya dadka jinsi kasta oo ay yihiin. HPV aad ayuu u faafaa oo ilaa 90% dadka galmada sameeya wuu ku dhici doona HPV mar noloshooda ka mid ah. Jidhku inta badan si dabiici ah ayuu iskaga nadiifiyaa infekshanka oo inta badan noocyada HPV, ma lahan wax astaamo ah. Si kastaba ha ahaatee, qaar ka mid ah noocyada HPV waxay keeni karaan nabaro ka soo baxa xubinta taranka iyadoo qaar ka mid ah fayraskuna uu ku sii jiri karo jirka sanado badan kadibna waxay sababi karaan kansar ku dhaca makaanka afkiisa, meelaha xubnaha taranka (xubinka taranka ee dumarka, cambarka, xubin taranka ee raga) futada, iyo afka iyo cunaha.</p>	<p><b>Gawracato</b> waa caabuq bakteeriya ah oo la kala qaado naftana halis geliya kaas oo keena dhibaato neefta ah oo daran, wadna xanuun iyo dhaawaca neerfaha.</p> <p><b>Teetano</b> waa cudur bakteeriya oo daran oo inta badan dilaa ah oo saameeya habdhiska dareenka. Dadka teetanada qaba waxay la kulmaan murqo xanuun daran, gariir iyo murqaha daanka oo adkaada. Kala-baxyadani waxay saameeyaan jirka oo dhan, taasoo keenta neefta oo kugu dhagta iyo wadnaha oo ku istaaga. Xataa haddii la helo daryeelka degdegga ah ee casriga ah, 50 kii qof ee ay ku dhacdo teetanada mid ka mid ah ayaa dhiman doona.</p> <p><b>Xiiqdheer</b>, ama xiiqleyda, waa cudur neef-mareenka ku dhaco laysna qaadsiiyo oo khatar ku noqon kara nolosha dhallaanka. Qiyaastii 125 kii ilmood ee da'doodu ka yar tahay 6 bilood ayna ku dhacdo xiiq-dheerta mid ka mid ah ayaa u dhinta burunkiito ama dhaawac ka gaaro dhanka maskaxeed. Dhallinyarada iyo dadka waaweyn ee qaba xiiq-dheerta waxay la kulmi doonaan astaamo qabow camal ah waxayna yeelan karaan qufac daran ilaa saddex bilood.</p>
<b>Sidee cudurku u faafaa?</b>	<p><b>HPV</b> waxa uu ku kala faafaa maqaarka xubinta taranka oo taabta maqaarka xubinta taranka qof kale marka lala samaynayo galmo qof qaba fayraska. Fayraska HPV waa wax yar-yar sidaa darteed wuxuu mari karaa daloolada yaryar ee maqaarka. Dhiiga laguma kala qaado. Kondhomyadu waxay bixiyaan difaac xaddidan oo ka dhan ah HPV, sababtoo ah ma daboolaan dhammaan maqaarka xubnaha taranka.</p>	<p>Bakteeriyada <b>gawracatada (Diphtheria)</b> waxay ku noolaan kartaa afka, sanko, cunaha ama maqaarka dadka cudurka qaba. Dadku waxay ku qaadi karaan gawracatada markay gudaha u neefsadaan bakteeriyada ka dib markii qof cudurka qaba uu qufaco ama hindhiso. Dadku waxay sidoo kale ka qaadi karaan gawracatada markay taabtaan dheecaannada ka yimaada afka, sanko, cunaha ama maqaarka qofka cudurka qaba.</p> <p><b>Teetano</b> waxaa sababa bakteeriyada laga helo ciidda iyo digada. Bakteeriyadu waxay jidhka ka geli kartaa nabar u yar sida daloolka cirbada. Dadka iskuma talaali karaan.</p> <p><b>Xiiqdheer</b>, Xiiqdheerta ama xiiqleyda waxay si fudud ugu faaftaa marka qof cudurka qaba uu ku qufaco ama ku hindhiso bakteeriyada hawada ka dibna ay gudaha u neefsan karaan dadka kale ee u dhow. Haddii aan la daawayn, qofka qaba xiiq-dheertu wuxuu qaadiin karaa dadka kale ilaa saddex toddobaad ka dib markay bilaabmeen astaamaha.</p>

	Human Papillomavirus (HPV)	Diphtheria-tetanus-pertussis (dTpa)
<p><b>Tallaalku ma yahay mid leh badbaado iyo waxtar?</b></p>	<p>Haa, in ka badan 350 milyan qiyaasood oo tallaalka HPV ah ayaa laga bixiyay adduunka oo dhan laga soo bilaabo tan iyo 2007, waxaa ku taliyay Ururka Caafimaadka Adduunka, waana mid badbaado leh aana lahayn saameyn xun. Tallaalka HPV wuxuu si fiican u shaqeeyaa marka lagu qaato da'da yar sababtoo ah ka jawaab celinta difaaca jirka ayaa ugu xoogan waxayna ugu waxtar badan tahay marka la qaato ka hor intaanay bilaabmin hawl galmo. Tallaalka HPV wuxuu waxtar u leeyahay 85 ilaa 100% ka hortagga noocyada ugu muhiimsan ee caabuqa HPV ee keena kansarrada iyo nabarada kasoo baxa xubnaha taranka. Dhammaan dumarka iyo dadka qaba afka ilmo-galeenka ee qaatay tallaalka HPV waxay weli u baahan doonaan baaritaan joogto ah oo kansarka ilmo galeenka ah sababtoo ah tallaalku ma daboolayo nooc kasta oo HPV ah.</p> <p>Caddaynta caalamiga ah iyo kuwa rugaha caafimaad ee ugu dambeeyay ayaa muujinaya in hal qiyaas oo ah tallaalka HPV uu bixiyo difaac aad u wanaagsan.</p>	<p>Tallaalka dTpa aad buu wax ku ool ugu yahay ka hortagga gawracatada iyo teetanada isla markaasna ku dhawaad 80% waxtar u leeyahay ka hortagga xiiq-dheerta.</p> <p>Tallaalkan xoojiyaha ah waxa uu leeyahay tiro yar oo xooga la saarayo gawracatada iyo qaybaha xiiq-dheerta marka la barbar dhigo tallaalkii la qaatay carruurnimada hore. Tallaalka xoojiyaha ah waa mid badbaado leh aana lahayn saameyn xun.</p>
<p><b>Maxay yihiin waxyeellooyinka suurtagalka ah ee daawada laga qaado maxaanse sameyn karnaa haddii ay dhacaan?</b></p>	<p><b>Waxyeellooyinka caadiga ah</b></p> <p>Meesha lagaa duray oo ku xanuunta/casaan ku noqota/cuncunta/nabar yar oo gacanta kaasoo kuusata.</p> <p>Si aad u baabiiso xanuunka, mari maro qabow oo qoyan meesha ay dhibaataadu saameysey.</p> <p><b>Wayeelooyinka aan dadka dhan isku arkin</b></p> <p>Qandho hoose, xanuun, lallabo, madax xanuun.</p> <p>Si aad u baabi'iso xanuunka, dadka ay saamaysay waxay qaadan karaan paracetamol sida lagugu faray calaamadda waxayna cabi karaan cabitaanno dheeraad ah. Haddii qandhadu ay sii socoto, u tag GP'gaaga.</p> <p><b>Waxyeelada aad dhifka u ah</b></p> <p>Xasaasiyad halis ah waa suurtagal, laakiin waa dhif. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah bararka wejiga ama neefsashada oo kugu adkaata. Sida ay tahay dawo kasta, waxa jirta fursad aad u fog oo talaalku ku keeni karo dhaawac ama dhimasho halis ah.</p> <p>Haddii falcelintu ay daran tahay ama ay tahay mid joogto ah, raadso daryeel caafimaad oo degdeg ah, lana xiriir isbitaalka xaafaddaada.</p>	<p><b>Waxyeellooyinka caadiga ah</b></p> <p>Heerkul khafiif ah (ka hooseeya 38°C)</p> <p>Si aad u baabi'iso xanuunka, qaado paracetamol sida lagugu faray calaamadda oo cab cabitaanno dheeraad ah.</p> <p>Haddii qandhadu ay sii socoto, u tag GP'gaaga.</p> <p>Meesha lagaa duray oo ku xanuunta/casaan ku noqota/cuncunta/nabar yar oo gacanta kaasoo kuusata.</p> <p>Si aad u baabi'iso xanuunka, mari maro qabow oo qoyan meesha ay dhibaataadu saameysey.</p> <p><b>Waxyeellooyinka aad dhifka u ah</b></p> <p>Brachial neuritis (bararka neerfaha gacanta, taasoo keenta daciifnimo ama kabuubyo).</p> <p>Xasaasiyad halis ah waa suurtagal, laakiin waa dhif. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah bararka wejiga ama neefsashada oo kugu adkaata. Sida ay tahay dawo kasta, waxa jirta fursad aad u fog oo talaalku ku keeni karo dhaawac ama dhimasho halis ah.</p> <p>Haddii falcelintu ay daran tahay ama ay tahay mid joogto ah, raadso daryeel caafimaad oo degdeg ah, lana xiriir isbitaalka xaafaddaada.</p>

Waxaa soo saaray Communicable Disease Control Directorate (Agaasinka Xakamaynta Cudurada la Isqaadsiyo)

© Department of Health 2023

Xuquuqda daabacaadda agabkan waxaa leh State of Western Australia ilaa si kale loo tilmaamo mooyee. Marka laga reebo sida cadaalaha ah ee leh ujeedooyinka daraasad gaar ah, cilmi-baaris, dhaleeceyn ama dib-u-eegis, sida lagu oggol yahay qodobbada *Sharciga Xuquuqda daabacaadda 1968*, lama oggola in qayb dib loo daabaco ama dib loogu isticmaalo ujeeddooyin kasta, iyada oo aan oggolaansho qoran laga helin State of Western Australia.